


# DASTUURKA URURKA

## BERBERA PEACE INITIATIVE (BPI)

**Qodobka 1aad: Magaca**

Ururkan waxaa la yiraahdaa **Berbera Peace Initiative (BPI)**, waana urur bulsho oo madaxbannaan, aan xisbi iyo dawlad toona ku xidhneyn.

**Qodobka 2aad: Dabeecadda Ururka**

Berbera Peace Initiative waa:

- Urur **nabad-doon ah**
- Ku shaqeeya **sharci, wacyigelin iyo dood furan**
- Ka fog **rabshad, naceyb, iyo kicin colaadeed**

**Qodobka 3aad: Himilada Guud**

In la ilaaliyo **nabadda, amniga, iyo danaha shacabka Berbera**, lagana hortago in magaalada laga dhigo goob military oo quwadaha ka hirdamaya Bariga dhexe loo soo raro taas oo dhawacaysa ganacsiga iyo amniga Magaalada Berbera.

---

**HADAFKA URURKA**

1. **Ka hortagga militarizationka Berbera**, Base Miliatary oo Israel ka samaysato Berbera waa khatar weyn oo aaney reer Berbera waxba ugu jirin iyo guud ahaan shacbiga Reer Soomaliland colaad loo soo raro mooye.
2. **Ilaalinta badbaadada shacabka**, hantidooda, iyo mustaqbalkooda.
3. **Kor u qaadida codka bulshada Berbera** si ay uga qayb qaataan go'aamada masiiriga ah ee nabadooda waxyeelaya.
4. **Dhiirrigelinta nabadda iyo xasiloonida Geeska Afrika**.
5. **Ka digidda khataraha ka iman kara colaadaha caalamiga ah** haddii lagu soo raro Magaalada Berbera.
6. **La xisaabtanka go'aamada siyaasadeed** ee Xukuumada Somaliland qaadayso isla markaana  saameynaya nolosha dadka rayidka ah.

---

**MABAA'DI'DA UU URURKU U TAAGAN YAHAY**

- Nabadda ayaa ka mudan dan kasta oo loo arko in Israel Base military ka samaysato Berbera.
- Shacabka waa in aan loo hudhin dano shisheeye.
- Berbera waa magaalo ganacsi & nolol, **Goob loogu talo galay in ciidan la dajiyo.**
- Bushada Berberi waxay xaq u leedahay inay diidan wax kastoo nabadooda wax yeelaysa.

---

**DOODDA IYO SABABAHA UU URURKU UGA HORJEEDO SALDHIG CIIDAN**

**1. Khatarta Colaadda Israel, Iran & Xuutiyiinta**

Haddii ay saldhig ciidan Israel  ku yeelato Berbera:

- Berbera waxay noqon kartaa **bartilmaameed toos ah** haddii colaadaha Israel, Iran, ama Xuutiyiinta ay sii fidaan.
- Khilaafka Badda Cas iyo Gacanka Cadmeed wuxuu Berbera gelinayaa **xaalad halis ah** oo sababi kara baro kac bulsheed, dhimasho iyo qasaare weyn oo maaliyadeed.

- Shacabka aan waxba galabsan ayaa noqonaaya kuwa ugu horreeya ee waxyeelloobaya.

**2. Halista Amni ee Shacabka**

- Gantaallo, weerarro ama falal aargoosi ah ayaa dhici kara.
- Dhaqaalaha, dekedda, iyo ganacsiga Berbera waa burburi karaan.
- Dadka deegaanka dawladu waxa xaq loogu leeyahay in bulshada uga waranto halista Base military oo ay qarinayso.

**3. Berbera oo laga Dhigo Goob Loolan Caalami ah**

- Magaaladu waxay lumin kartaa doorkeedii ganacsi iyo nabadeed.
- Xiisado colaadeed oo la mahadin ayaa inooga iman kara Iran iyo Xuutiyiinta.
- Mustaqbalka dhalinyarada Berbera ayaa halis galaya.

**4. Madaxbannaanida Go'aanka Bulshada**

- Go'aamo waaweyn oo noocan ah waa in lagu saleeyaa:
  - talada shacabka,
  - Laguna saleeya daraasad qoto dheer oo amni
  - Laguna saleeyo danta guud maxaa soo gaadhaya ee aan lagu salayn heshiisyo siyaasadeed oo qarsoon oo shaqsiyaad dan u ah si qarsoodiyana loo soo galay.

---

**BAAQA URURKA**

Berbera Peace Initiative waxay:

- Baaq u diraysaa **mas'uuliyiinta**, **cuqaasha**, **aqoonyahanka**, iyo **dhalinyarada deeganka Saaxil.**
- In Berbera laga ilaaliyo **colaado shisheeye**
- In nabadda lagu beddelo **horumar iyo wada-noolaansho iyo ganacsi iyo horumar.**

---

## DASTUURKA RASMIGA AH EE BERBERA PEACE INITIATIVE (BPI)

---

### HORDHAC

Anagoo ka duulayna mas'uuliyadda naga saaran ilaalinta nabadda, amniga, iyo danaha shacabka Berbera.
Anagoo tixgelinayna halista ka iman karta militarizationka iyo saldhigyada ciidan ee shisheeye.
Anagoo aaminsan in Berbera tahay magaalo ganacsi, nabad, iyo nolol bulsho ee aanay ahayn goob colaado caalami ah la keeno.

Waxaan halkan ku dhisaynaa **Berbera Peace Initiative (BPI)**, urur bulsho oo u taagan nabad, wacyigelin, iyo difaac dan guud.

---

### CUTUBKA I: MAGAC, DABEECAD IYO XARUN

**Qodobka 1aad: Magaca**

Ururkan magaciisu waa **Berbera Peace Initiative (BPI)**.

**Qodobka 2aad: Dabeecadda Ururka**

Berbera Peace Initiative waa:

1. Urur bulsho oo madaxbannaan.
2. Aan ku xidhnayn xisbi siyaasadeed ama ciidan.
3. Ku shaqeeya mabda'a nabadda, sharciyadda, iyo wacyigelinta bulshada.
4. Ka fog rabshad, nacayb, iyo kicin colaad.

**Qodobka 3aad: Xarunta Dhexe**

Xarunta dhexe ee ururku waa **Magaalada Berbera**, waxana uu ka hawlgeli karaa meel kasta oo sharci ahaan suurtagal ah.

---

### CUTUBKA II: HIMILADA IYO HADAFKA

**Qodobka 4aad: Himilada Guud**

Himilada, Berbera Peace Initiative waa **ilaalinta nabadda, amniga, iyo danaha shacabka Berbera**, iyo ka hortagga in magaalada laga dhigo goob Military taas oo

aanay dan ugu jirin bulshada ku dhaqan Berbera, Colaada Israel ka soo rareyso Dalkooda ee ku soo wajahayso Berbera waa mid cid kastaaba fahansan tahay, hadaanu nahay reer Berbera colaad ma rabno waxaanu rabnaa horemar, dhaqaale iyo waxbarasho cidii aan intaa hayn marnba la shaqayn mayno.

**Qodobka 5aad: Hadafyada Gaarka ah**

Ururku wuxuu leeyahay hadafyadan:

1. In laga hortago saldhigyo ciidan oo shisheeye oo laga sameeyo Berbera.
2. In la ilaaliyo badbaadada nolosha, hantida, iyo mustaqbalka shacabka.
3. In la wacyigeliyo bulshada ku saabsan khataraha militarizationka.
4. In la dhiirrigeliyo ka-qaybgalka shacabka ee go'aamada masiiriga ah.
5. In la ilaaliyo xasilloonida iyo nabadda Geeska Afrika.
6. In la ka digo khataraha colaadaha caalamiga ah ee lagu soo rari karo Berbera.

---

**CUTUBKA III: MABAA'DI'DA ASAASIGA AH**

**Qodobka 6aad: Mabaadi'da**

Ururku wuxuu ku taagan yahay:

1. Nabadda ayaa ka horraysa dan kasta oo ciidan.
2. Shacabka lama gelin karo khatar si loo fuliyo dano shisheeye.
3. Berbera waa magaalo ganacsi iyo nolol bulsho, hadafkeeduna waa in noqoto magaalo lagu soo hirto isla markaana loo yimaado dalxiis, ganacsi iyo in la maalgaliyo.
4. Dood, wacyigelin, iyo sharci ayaa ah hababka kaliya ee ururku u adeegsadaanyo xalka.
5. Go'aamada waaweyn waa in lagu saleeyaa dan guud iyo talada shacabka

---

**CUTUBKA IV: DOODDA IYO SABABAHA SHARCI AH**

**Qodobka 7aad: Khatarta Colaadaha Caalamiga ah**

Haddii saldhig ciidan oo Israel ama cid kale ay ka samaysato Berbera:

1. Berbera waxay noqon kartaa bartilmaameed toos ah oo colaadaha u dhexeeya Israel, Iran, iyo Xuutiyiinta.
2. Xiisadaha Badda Cas iyo Gacanka Cadmeed ayaa si toos ah u saamayn kara amniga magaalada iyo ganacsiga dakada imanaya maadama Xuutiyiintu la dagaalamaan cid kastoo la socota Israel horena ay u dhacdey.
3. Shacabka rayidka ah ayaa noqon kara kuwa ugu horreeya ee waxyeelloobaya.

**Qodobka 8aad: Khatarta Amni iyo Dhaqaale**

1. Halista weerarro, gantaallo, ama falal aargoosi ayaa kordhaysa.
2. Dekedda Berbera iyo ganacsigeeda ayaa dhaawac weyn gaadhi kara.
3. Maalgashi iyo horumar dhaqaale ayaa istaagi kara.

---

**CUTUBKA V: QAAB-SHAQO IYO HAWLGAL**

**Qodobka 9aad: Hababka Ururku u Shaqeeyo**

Ururku wuxuu hawlihiisa ku fulinayaa:

1. Wacyigelin bulsho.
2. Qoraallo, bayaanno, iyo dood cilmiyeedyo.
3. La-tashi iyo wadahadal nabadeed.
4. Iskaashi bulsho iyo mid aqooneed.

---

**CUTUBKA VI: XUBINNIMO**

**Qodobka 10aad: Xubnaha**

1. Xubin wuxuu noqon karaa qof kasta oo aqbala dastuurkan.
2. Xubnuhu waa in ay ku dhaqmaan mabda'a nabadda iyo sharciyadda.
3. Xubinimada waa ikhtiyaar, sinaanna waa lagu saleynayaa.

---

## CUTUBKA VII: WAX KA BADALKA DASTUURKA I

### Qodobka 11aad: Wax-ka-beddel Dastuur

Dastuurkan waxba  lagama beddeli karo ilaa ay oggolaadaan xubnaha ururka, si sharci ah oo furan.

### Qodobka 12aad: Dhaqan-gal

Dastuurkani wuxuu dhaqan galayaa marka ay ansixiyaan aasaasayaasha ururka shirweynahoodu dhawaan dhici doono si cod ah buu loo dhaqan galinayaa.

WA BILAAHI TAWFIIQ.